Somaliska

Vilket imorgon kommer jag att välja?
– om uppväxt och föräldraskap i olika kulturer

Teebaan berri dooranayaa?
– koritaanka iyo waalidnimada dhaqamada kala duwen

Folkbildningsförbundet –
Studieförbundens intresseorganisation,
Stockholm 2004.

Teebaan berri dooranayaa?
– koritaanka iyo waalidnimada dhaqamada kala duwen

Maxay micno leedahay in qofku noqdo waalid jooga Iswidhan oo ka yimid waddan kale? qoraalkani ayaa arrintaasi ku saabsan.

Qofka waalidka ahi wuxu ka baqan karaa in uu ilmihiisa waayo, taas oo loola jeedo ”isaga oo isbaddela” oo la yimaadda qiimayn iyo aragtiyo kale oo loo arko kuwa qalaad. Ilmahaagu wuxuu ku korayaa oo ku barbaarayaa waddankan Iswidhan. Maxaad samaynaysaa si ilmahaagu uu u haysto oo aanu u lumin dhaqankiisa? Intee in leeg ayaad ilmahaaga u oggoshahay in uu qaato dhaqanka iswidhishka? Carruurtu ma haysan karaan dhaqamo kale duwen misse waa in ay mid uun doortaan?

Dhammaan waalidiintu waxay mararka qaarkood dareemaan in aanay badbaadsanayn. Sidee ayey carruurtaadu noqon doonaan? Way fiicantahay in arrintaas si wada jir ah loogala hadlo waalidiinta kale.

Shalay, maanta, berrito
Russl Almosawi

Sahalay
kaynta guriga dhexdiisa
ayey hooyo iigu feedhaysay timaha
iiguna tididcday laba tidic.
Maanta
waa waddo isgoys ah oo u dhaxaysa shalay iyo berri
Teebaan
Berri
dooranayaa?

1. In qofku ku koro waddan kale?

waxa la dareemi karaa cadho marka ilmo dhallinyar ah oo wiil ama gabadh ahi uu waalidkiisa ku yidhaahdo anaa kaa aqaan wax, waayo waalidiintu lama socdaan sida uu noqon doono xaalka Iswidhan. Waxa laga yaabaa in uu waalidku cadhoodo dabadeed rabashad ama islayni ay timaaddo.

Dhallinyaradu badankoodu waxay donayaan in ay mjuujiyaan in ay madax bannaanyihiin. Taasina maaha in ay noqdeen ”iswidhish”. Mana aha weliba in ay ka dheeraadeen waalidkoodii ama dhaqankoodii. Haddii dhallinyarada aan la qasbin ee loo oggolaado in ay iyagu doortaan, waxay mideyn karaan labada dhaqanba.

- Wax ma kugu qasbeen waalidiintaadu markaad yarayd?
- Sideey kugu ahayd?
- Sidey noqon lahayd haddad adigu dooran lahayd?

Carruurtu halkan ayey ku noolyihiin immikana waxay doonayaan in ay labadaba dhaqanba haystaan
Waalidiinta iyo qoyskaba waxa micno weyn ugu fadhiya waxa ay carruurtu baranayaa. Waxa

kale oo wliba micno u leh saaxiibbada dugsiga xannaanada iyo dugsiga caadiga ah iyo dhammaan mujtamaca ama bulshada kale ee ku xeeran.

Carruurtu waa in ay isku dayaan in ay tijaabiyaan sidii ay u fahmi lahaayeen wax kasta oo ay arkaan ama ay maqlaan. Haddii siyaabo kala duwen ay u kala fikiraan qoyska iyo bulshadu kolkaa waxay isku dayaan in ay fahmaan labadaba. Waxa dugsiga ku saabsan ee lagu dhigtaa wuu ka duwen yahay waxa qoyska. Dugsiga marka la joogo looma fikiro had iyo jeer sida guriga. Laakiin carruurtu ma dooran karaan mid qudha uun. waxay ku dhex nool yihiin labada arrimodba.

Intooda badani waxay jeclyihiin in ay qaataan labada dhaqanba ”labadaba”. Waxa iyaga loogu yeedhi karaa ”carruurtii wax isku xidhaysay”. Taasi micnaheeduna waxa weeyi in ay yihiin iswidhish iyi fiinish, kurdi iyo iswidhish, giriig iyo iswidhish ama soomaali iyo iswidhish iwm. Waxay isku xidhi karaan adduunka. Taasmicnaheeduna maaha in dhaqan walba ay ”nus ama badh” ka noqdaan. Labadaba si buuxda ayey u qaadan karaan!

- Ma kuu kala duwanaayeen deegaanka kugu wareegsani markaad carruurta ahayd?
- Siday waalidiintaadu arrintaas u arkeen?
- Maxay micno kuu lahayd adiga?
- Maxaad u aragtaa in ay khasaaro adiga kuu leedahay in aad ku dhex korto laba ama dhowr dhaqan oo kala duwen?
- Waa maxay faa’iidooyinka ay leedahay?
- Waa maxay fikradda aad ka haysataa sawirka xidhiidhinta ”bindestrecket”?
- Intee in leeg baad ka qaadan kartaa labada dhaqan?
- Intee in leeg buu ka qaadan karaa ilmahaagu?

> ”Iskuma haysto in aan iswidhish ahay, iyo xitaa turki midna. Waxaan isku haystaa in aan ahay Ayse. Ma karayo faraqa u dhaxeeya ‘iyaga’ iyo ‘annaga’ Waxaan ahay Ayse ka yimid magaalada Stockholm oo haysta saaxiibo nooc walbba ah leh.”
> *Multikultiungdom.*

Dhaqanka dhallinyarada
Dadku waxay leeyihiin dhaqan la xidhiidha qolooyinkooda iyo mujtamacooga ay ka tirsanyihiin iyo jiilka ama facooda. Dhallinyarada ka timid qolooyin kala duweni way ka wada tirsan yhihiin dhallinyarada iyo waayeelka isku koox ka yimid. Hannaanka kala duwen marka laga hadlayo muuqaalka, dharka iyo muusiggu waxay kooxda ka dhex abuuraan dareen wada jirnimo.

Qof dhallinyaro ah oo ku nool waddan kale oo aan ahayn waddankii waalidiintiisu ay ka yimaaddeni wuxu leeyahay ugu yaraan in uu qaato saddex dhaqan:
– Dhaqankii waalidiintiisa,
– dhaqanka inta badan ee iswidhishka iyo
– dhaqanka dhallinyaranimada!

- Ma dareemeysey in aad ka tirsan tahay mid ka mid ah ”dhaqamada dhallinyarada” markaad yarayd?
- Maxaad dhallinyarnimadiinii kaga duwanaydeen dadka waayeelka ah ee degaankiinna joogey?

Isbeddelada u dhaxeeya faca ama jiilasha
Dhallinyaradu waxay doonayaan in ay wax baddelaan dadka waaweynina waxay doonayaan

in wax walba sidiisii hore ahaado. Taasina maaha wax lala yaabo. Dadku waxay doonayaan in ay sii haystaan waxa caanka ah ee aadka loo yaqaan. Waxa cusub ee aan la garanaynin wuxu abuurayaa badbaado darro. Inta badanna khilaafyo ayaa ka dhex dhaca facyaasha ama jiilasha.

Waxyaabo badan oo aynnu ku barranno carruurnimada waa waxyaabaha aynnu isku naqaanno, iyada oo aanay cidina ka hadal sida ay wax noqonayaan. Waxa ama dulucda dhaqan ku jira ma doonayno in ayynnu baddelno.

- Maxay da'daadii ama jiilkaagii iyo waalidiintaada jiilkoodii ku kala duwenayaan ee aanay isku aragti iskaga ka ahayn?
- Ma ogtahay in uu jirey khilaaf u dhaxeeyey waalidkaaga iyo jiilkii waalidiindooda?
- Waa maxay habka nolosha kuugu muhiimsan ee aad doonayso in aad u gudbiso ubadkaaga?
- Waa maxay waxa ugu muhiimsan ee ay kula tahay in iswidhan lagu jeclaado?
- Waa maxay waxa aad u aragato in ilmahaaga ama dhallinyaryarkaaga aad si isku mid ah u wada jeceshihiin?

Dhaqamadu way isbaddelayaan?
Dadka ku nool dhaqan way baddelaan dhaqankaas, si tallaabo tallaabo ah, had iyo jeer. Had iyo jeerna sidaas ayey ahayd. Dhaqamada, caadooyinka qiimaynta iyo dhaqamada diimuhu hore ayey u marayaan iyada oo qaar la tuurayo, qaar xoogeysanayaan qaarna si cusub loo turjumayo.

Dhammaanteen waxaynnu ku dhexjirnaa dhaqankeenna innaga oo dhab ahaan u arakayn dhaqanka (sida kalluunka biyaha ku jira) isla markaana dib u habayn lagu sameeyo. Dhaqanku badanaa wuxu muujismaa oo uu caddaadaa ugu horrayn marka la barbardhigo ku kale.

Xitaa dhaqan keliya oo isku mid ah waxa jira kooxo kala duwen, oo ku kala haysta caadooyin iyo aragtiyo kala duwen. Mid kasta oo innaga inaga mid ahi wuxu leeyahay doorar kala duwen oo dhaqameed, tusaale ahaan doorka qoyska, ka shaqada iyo marka uu la kulmo dadka aan u garanayn.

- Maxaa iska baddelay dhaqankaaga wakhtigii facaaga ama jiilkaaga? (vad har förändrats i din kultur under din genations tid?

2. In aad waalid u noqoto qof dhallinyaro ah

Dhammaan waalidiintu waxay doonayaan in ay ku faanaan carruurtooda isla markaana dareemaan in ay waalid ahaan guuleysteen. Taasina way fududahay inta ay carruurta yihiin, laakiin badanaa wa ka sii adkaataa marka ay dhallinyaro noqdaan ee ay bilaabaan in ay wax dhaleeceeyaan.

Dhallinyaradu waxay isweydiiyaan"ayaan ahay anigu" waxayna tijaabiyaan doorar iyo xuduudo kala duwen si ay u ogaadaan in ay "sax sanyihiin". Waalidiintu waa in ay ka gilgishaan marka dhalliyaradu ay ka tallaabayaan xuduudaha muhiimka ah, laakiin si taxaddir leh. Haddii kalese waxa dhici karta in qofku ku xidho ama ku rido dhallinyarada wixii la doonayey in laga badbaadiyo.

Waalidiintu waxa ay ka werwersan yihiin carruurtooda, laakiin had iyo jeer ma jirto sobob loo werweraa. Waalidiinta werwersani su'aalo badan ayey weydiiyaan. Kolkaas ayaa qofka dhallinyarada ahi uu dareemaa in aan la aaminsanayn oo la kantaroolayo, dabadeena waxay

keenaan diidmo iyo jawaabo gaagaaban. Waa dabiici in dhallinyaradu ay in muddo ah ay ka fakadaan waalidiinta – dabadeedna ay dib ugu soo noqdaan.

- Maxaad ugu werwereysaa ilmahaaga ama qofkaaga dhallinyarada ah?
- Ma jirtaa sobob dhab ah oo loo werweraa?
- Siday kula tahay in ilmahaaga ama qofkaaga dhallinyarada ahi uu u fahmo ama u arko werwerkaaga?
- Sideed u aragtaa in dad badan oo iswidhish ahi ay u werweraan dhallinyaradooda?

”Waa in aad bilowdaan in aad na aamintaan! Waanu ku faanaynaa in aannu nahay kurdi, laakiin waxaannu xaq u leenahay xorriyaddayada. Waa in aad arrintan nagu caawisaan oo aydaan noqon hooyooyin wax ku amar ku taagleeya!”
Wadahadalkii hablaha dhallinyarada ee kurdida iyo hooyooyinkooda, waxa isku soo dubbaridey iskutagga guud ee ururka Kurdistaan
Kurdiska tonårsflickor i en diskussion med sina mammor. Diskussionen ordnades av Kurdistans kvinnoförbund.

In aad noqoto waalid Iswidhan jooga maanta?
Waxa laga yaabaa in ay adkaatay in waalid la noqdo maanta. Carruuta iyo dhallinyaraduba waxay waxyaabo badan ka ogaadaan saxaafadda ama warbaahinta. Waxyaabo badan ayey isweydiiyaan ama ay saaraan caalamtul su’aal. Waxay doonayaan in ay ogaadaan sobobta oo aan ahayn qawaaniinta iyo mamnuucidda oo keliya.

Haddii ilmahaagu uu bilaabo in uu kula doodo waxa laga yaabaa in aad u aragto in aad is layseen oo uu tarbiyad xunyahay. Waxa dhici karta in waalidiinta iswidhishkana in sidaas si la mid ah xaalku ku yahay. Waa in dhammaanteen aynnu baranaa in carruurteenna aynnu u qaabbilno si ka duwen sidii waalidiinteennu ay sameeyeen. Xitaa tarbiyadda carruurta ee iswidhishku aad ayey isku baddeshay marka la eego facaha iyo jiilasha.

- Ma jirtaa wax aanad ku jeclayn ”dhaqanka carruur korinta ee iswidhishka”
- Sideed adiga naf’ahaantaadu dooneysaa in aad wax u qabato? oo waayo?
- Sideed u aragtaa in qof waalid iswidhish ahi uu wax ugu sharrixi kari lahaa sida aad u fikirayso ee aad waxna u qabato?

Xuquuqda carruurta?
Heshiiskii jamciyadda quruumaha ee carruurtu wuxu leeyahay:
– Carruurta waa in laga ilaaliyaa dhammaan nooc kasta oo midab kala sooc ah (qodobka 2aad).

– Waa in wax kasta oo carruurta u fiicaan ihtimaam lagu siiyaa dhammaan wixii go’aan ah ee la gaadhayo (qodobka 3aad).

– Waalidiintu waa in ay ilmaha barbaariyaan oo ay hagaan ama waddada saxda ah tusaan (qodobka 5aad).

– Ilmuhu wuxu xaq u leeyahay nolol iyo horumar (qodobka 6aad).

– Ilmuhu wuxu xaq u leeyahay in uu sheego aragtidiisa taana lagu ixtiraamo (qodobka 12aad).

– Ilmaha waa in aan lagu dhibaateyn si sharci darro ah wax aan sal lahayn noloshiisa gaar

ahaaneed iyo nolosha qoyskaba, gurigiisa iyo marka waraaqaha lays weydaarsanyoba (qodobka 16aad).

Marka la tixraaco qaanuunka iswidhishka carruurtu waxay xaq u leedahay daryeel caafimaad, badbaado iyo rabbayn fiican. Rabbayn fiican micnaheedu waxa weeyi:
in ilmuhu uu barto xuduudaha iyo qaadidda mas'uuliyadda,
in uu dareemo ama ogaado in loo baahanyahay,
in horumar uu sameeyo iyo
in ka dib loo oggolaado in uu ka madaxbannaanaado ku tiirsanaanta waalidka.

Ilmuhu wuxu xaq u leeyahay in loola dhaqmo oo la ixtiraamo qofnimadiisa.
Ilmuhu iyada oo wakhtiga loo eegayo wuxu xaq u leeyahay in si adag loo ilaaliyo dadnimadiisa.

- Ilmaha looma geysan karo ciqaab jidhka ah ama fal kale oo sharafridid ah.
- Waa maxay qodobada kala duwen ee heshiiska jamciyadda quruumaha ee carruurtu maanta?
- Waa kuwee kuwa ka mid ah xuquuqahan ee aad xaq u lahayd markii aad carruurta ahayd?

3. In aad noqoto waalid waddan kale jooga?

"Ka ugu dheer socdaalladu waxa weeyi kan innaga naf'ahaanteednna inagu jira waxaanu had iyo jeer ku bilaabmaa in qofku barto wax cusub, wax kale, wax qalaad ama shisheeye"
Theodor Kallifatides i boken "Ett nytt land utanför mitt fönster".

Hababka la maro marka la haajirayo
Marka qofku ka baxo ee uu ka tago waddankiisa waxa bilaabma isbaddello badan qofkuna ma noqdo sidii hore. Taasina waa mas'uuliyad adag in qofku meel ka tagaa. Dalandoolidda micnaheedu waxa weeyi sagooti adag, werwer iyo cabsi. Qofka oo baxsada ama guura ayaa noqon karta wax xiiso yar ama xiiso badan. Haddii qofku qaxooti noqdo waxa uu la kulmi karaa masiibooyin badan, xaalodo khatar iyo haddidaadba ah. Xilliga ugu horreeya ee qofku Iswidhan yimaddo wuxu dareemaa badbaado la'aan, waddankiisii oo uu tebo iyo werwer mustaqbalka ah.

Marka qofku waddan baddelo waa in uu wax kasta dib u soo bilaabaa iyada oo luqaddu ku cusubtahay, waxa laga yaabaa in uu bilaabo xirfad cusub ama bilaa shaqaba noqdo.

Dabadeedna si tallaabo tallaabo ah ayuu ugu sii socdaa nolosha cusub horena ugu maraa. Kolkaas oo qofku uu wada maray dhammaan hababka la maro marka la haajirayo. Taasina wakhtiyo kala duwen ayey ku qaadan kartaa dadka kala duwen.

Hababka la maro marka la haajirayo:
- Socdaalid ama dhoofid: awood darro iyo waxqabad iyo go'aan qaadasho
- Qaxooti ama baxsad: werwer iyo badbaado darro
- Xilliga ugu horreeya ee waddanka cusub: Dib u habayn, la qabsasho iyo u boholyoobid waddankii hooyo.
- Muddo ka dib: Ismasruufid, ishanuunin cusub iyo dadka dhexgelid

- Waa maxay waxa halkan ku keenay?
- Siduu kugu ahaa wakhtigii kuugu horreyey ee Iswidhan?
- Halkeed adigu kaga jiryey habka soo haajiridda?
- Halkuu ilmahaagu kaga jiery habka soo haajiridda?

Annaga iyo iyaga
Waa wax iska dabiici ah in qofku marka hore ka maago oo dib uga joogtsado waxyaabaha ku cusb ee uu kala kulmo waddanka qalaad. Isla markaana isaga oo waddankiisa kor u qaadaya oo cirka geynaya. Laakiin waa in aanu taasi dhexfadhiisan.

Marka aannu la kulanno wax qalaad waxaannu kaayaga u aragnaa sikale oo cusub. Sidaas awgeed ayaannu badanaaba u aragnaa ”ku kale” wax ”lala yaabo” oo qalaad. Waxaynnu dadka u qaybinaynaa ANNAGA iyo IYAGA. Waxay taasi xoojinaysaa dareenka wada jirka.

Haddii aynnu awoodno in aynnu isbaranno waxaynnu dhisi karnaa buundooyin ama biriijyo. Waxaynnu arki karnaa isku midahaanshaha, faraqyada dadka u dhaxeeyaanna waxay noqonayaan wax xiiso leh.

- Maxaad badanaa diidaa marka la eego dhaqanka iswidhishka?
- Maxaad u malaynaysaa in badanaa iswidhishku ay kugula yaabaan dhaqankaaga?
- Maxaad u malaynaysaa in taasi ay ku xidhan tahay?
- Maxaa lagu samayn karaa ee lagu hagaajin karaa muqaalada kala duwen ee labada dhinac si wadajir loogu wada noolaan karo?

Boholyowga iyo xanuunka
Qofka lagu qasbo in uu ka baxo waddankiisa wuxu dareemayaa murugo iyo boholyow. Qofka oo jeclaada in uu dib ugu noqdo waddankiisa waxa loogu yeedhi karaa waa boholyow ama buseelid. Waa dareen diirran oo dadku ku xusuusanayaan, meelo, udgoonkii, heesihii iwm. Erayga nostalgi wuxu ka yimid erayga giriigga ah ee nostos, oo ah dib u noqosho iyo waxa loo yaqaan algos iyo xanuun.

Mararka qaarkood qofka waxay kaga dhegtaa uun boholyow isaga oon karayn in uu intaas sii dhaafo. Dadka iyagu ku adkaysta wixii ay waagii hore xusuusnaayeen, ayaa badanaa dhibaato ka haysataa in ay raalli ku noqdaan waxyaabahan immika ku cusub. Haddii waalidiintu ay dhexfadhiistaan waxa loo yaqaan nostalgi oo ay arki kari waayaan xagga hore, waxa laga yaabaa in aanay si fiican u arag carruurtooda iyo waxay u baahan yihiin toona.

- Waa maxay waxaad badanaa ugu boholyowdaa waddankaaga?
- Ma garaynaysaa waxa loogu yeedho hagaajinta habka loo yaqaan nostalgisk?
- Maxaad u malaynaysaa in arrintaas wax lagaga qaban karo?
- Sidee loo heli karaa si labaduba ay u helaan boholyow una arkaan xagga hore una hantaan waxyaabaha cusub?

”Aniga ayaa halkan qoraalkan waxaan ku bilaabayaa in si badheedh ah loo lafa guro wixii aniga igu dhacay ka dib markii aan lix iyo soddon sannadood ku jirey nolol qalaad.
Maan noqon qof iswidhish ah, xitaa haddii aanan ahayn giriiggii aan rumaysnaa in aan ahaa. Qofna shisheeye kumaan ahayn boqolkiiba boqol. Hadalkii oo kooban ma odhan karo waxaan noqday. /.../
Waxa jira xilliyo kooban oo aan isku arko in aan qaawanaa intii aanan dhalanba, kolkaas oo siday doontaba ha ahaatee qofku leeyahay xundhurta dheer ee isku xidha ilma-

ha iyo madheerta hooyada, waxaanan tacsiyadaynayaa ka dib markii ay guuldarradu ku timid taariikhdii jacaylka.
Laakiin waxa kale oo weliba jira xilliyo kooban oo aan dareemayey xorriyad qoto dheer oo muujineysay in aan bartay in aan jeclaado wax kale oo aan ahayn wixii isoo maray"
Theodor Kallifatides i boken "Ett nytt land utanför mitt fönster".

Dadka oo aan isku xawli ahayn
Dhammaan xubnaha qoyska ka tirsani waxa laga yaabaa in xawli isku mid ah aanay kusoo wada marin habka la maro marka la haajirayo. Waxay carruurtu u baroordiiqaan dadkii, meelihii iyo waxyaabihii qasabka lagaga soo saaray ee waddankooda. Laakiin immika way noolyihiin waxayna doonayaan in ay ogaadaan oo ay si fiican u baadhaan waxa cusub.

Haddii waalidiintu aanay ka qayb qaadan waxyaabaha xaqiiqda ah ee carruurta ku saabsan, kolkaa carruurta iyo waalidiinta way ku adkaanaysaa in ay is fahmaan.

- Waa ayo cidda go'aamisay in aan waddanka ka baxo
- Siduu ilmahaagu ku ogaaday waxa dhici doona?
- Maxaad u malaynaysaa fikradda ilmahaagu uu ka qabo waddankii hooyo?
- Ma u malaynaysaa in ilmahaagu uu dareensan yahay in aad u oggoshahay in uu jeclaado dugsigiisa xannaanada ee iswidhishka ama dugsiga caadiga ah iyo saaxiibadiisaba?
- Sideed u malaynaysaa in hijradii waddankii aad ka timaadeen wax uga baddeshay ilmahaaga?

Quudhsi ah xannibaad
Ilmo kuma kori karo kumana fiicnaan karo deegaan aanu jeclayn. Ilmaha ku koray Iswidhan waa in uu jeclaadaa iswidhishka. Way ku adkaanaysaa haddii waalidiintu ay quudhsadaan iswidhishka isla markaa deegaanka ama bay'adda ilmaha ku wareegsani uu ka durugsanyahay dhaqankii ilmaha asalka u ahaa. Kolkaa waxa laga yaabaa in ilmuhu uu bilaabo in isaga naf'ahaantiisu uu is quudhsado.

- Maxaad ka qabtaa fikradaha ah quudhsiga iyo isquudhsiga?
- Adiga naf'ahaantaadu quudhsi ma ka dareenatay deegaanka ama bey'adda kugu meersan?

Riyooyinka ku saabsan mustaqbalka ama aayaha dambe ee carruurtya
Ilmaha taga dugsiga xannaanada carruurta iyo dugsiga caadiga ah ee iswidhishka lana ciyaara saaxiibbo iswidhish ah wuxu la hoydaa fikrado cusub. Waalidiintu waxay ka baqaa in ay waayaan ilmahooda, oo uu noqdo "mid nooc kale ah", oo waata argati shisheeye.

Qofka oo lagu qasbo in uu ka baxo waddankiisa hooyo had iyo jeer way adagtahay. Laakiin waxay kicin kartaa rajada ah in ilmuhu helo mustaqbal fiican. Marka qofku ka baqanayo in ilmihiisu uu noqdo "iswidhish" kolkaa waxa laga yaabaa in riyooyinkii ay baaba'aan ama burburaan.

Mararka qaarkood ilmaha ayaa ka mas'uul ah si ay u miisaanto wixii waalidiintu ay waayeen. Taasina waa culays aan macquul ahayn in la qaado.

"Marka aabbo uu ka sheekaynayo faqiirnimadii uu ku soo noolaa waan ooyaa. Waanan ka xumaadaa oo murugoodaa, laakiin maxaan qaban karaa? Immika waxaan si joogta ah ugu mahadinayaa in aan fiicanahay. Laakiin waxay ahayd nolol kale."
Nina i Multikultiungdom.

- Mar uun ma ka werwertay in ilmahaagu uu siwidhish noqdo?
- Ma kula tahay in ilmahaagu uu u arko waxyaabaha aad ka sugeysaa in ay yihiin rar culus oo aad saarayso?

4. Qoyska, jacaylka iyo galmoodka

Waa maxay qoys?
”Qoys” wuxu noqon karaa waxyaabo kala duwen – ehelada oo dhan, ama aabbaha oo qudha, hooyada iyo carruurta. Qoysku muhiim ayuu ku yahay waddankan Iswidhan sida qaybaha kale ee adduunkaba, laakiin si ka duwen. Gabadha iyo ninkaba waxa saaran culays isku mid ah. Mid kastaba mas’uuliyaddiisa ayaa saaran. Mararka qaarkood ilmaha dhallinyarada ahi wuu ka durki karaan qoyska si uu u tuso madaxbannaanidiisa.

Waa ayo cidda leh awoodda, mas’uuliyadda iyo hawlaha qoyska iyo bulshada ee muddo gaaban isku baddeshay waddankan Iswidhan. Waagii hore wadajirka qoyska iyo ehelada ayaa muhiim ahaa. Maanta carruurtu waxay Iswidhan ku koraan qoysas kala duwen. Intooda badani waxay la koraan hooyadood iyo aabbahood. Laakiin kuwa badan ayaa la kora waaliddo kala tagey iyo waaliddo aan midkood dhalin, carruur waalid kale ula yimid iyo carruur ay dhinac uun ka walaalo yihiin.

- Muxuu qoysku adiga micno kuu leeyahay, sideed u aragtaa (vad betyder familj för dig)?
- Sideed u aragtaa micnaha qoysku u leeyahay dadka iswidhishka ah ee aad taqaanno?
- Wada jirkii qoysku miyuu si uun isku baddelay waayadan dambbe waddankaagii hooyoo?

Doorarka cusub ee qoysku ciyaari karo?
Qofka ku hela Iswidhan waxbarasho ama shaqo ayaa si degdeg ah bulshada u soo dhex geli kara. Mararka qaarkood haweenka ayaa ka dhib yar nimanka sidii waddooyin cusub ay u heli lahaayeen. Carruurtuna si degdeg ah ayey ku helaan aqoon ku saabsan iswidhishka. Dadka waaweyni mararka qaarkood waxay ku xidhnaadaan carruurtooda marka laga hadlayo sidii ay ula xidhiidhi lahaayeen. Dabadeed kolkaas aabbuhu maaha ka og ee kara in uu u hadlo qoyska. Dabadeed doorar ama kaalin cusub ayaa qoyska ka soo dhex baxda oo waxa laga yaabaa in uu yimaaddo iska hor imaatin.

> ”Carruurta qaxootigu waalidkkoda way ka naxaan. Wax kasta way ka yimaadeen waxaanay yimaaddeen waddan si joogta ah ay caawimo ugu baahan yihiin maaddaama aanay karayn luqadda. Carruurta iyo dhalliyaradu way ka hor bartaan dadka waaweyn, waxayna degdeg u bilaabaan sidii ay waalidkooda uga caawin lahaayeen xidhiidhada kala duwen ee bulshada iswidhishka. Dhinaca kale marka la eego waxa aad wax loo eegaa marka dadka waaweyn la yahay marka la barbar dhigo marka carruurta la yahay.”
> *Nalin Pekgul.*

Maaddaama waxyaaba badani qoyska dhexdiisa ka dhacaan, way adag tahay in laga hadlo. Qofku ma jecla in uu dadka kale tuso in ay dhibaatooyin haystaan.

- Ma garanaysaa macluumaadkaas ama xusuusanaysaa sharraxaaddaasi qoyskaaga?
- Sida ay doonta ha ahaatee ma ka hadasheen arrintaasi?
- Ma jiraan halkaasi qoysas kale oo ay xaaladdu sidaas la mid tahay?
- Ma kawada hadli kartiin arrintaasi?

Dumarka jooga Iswidhan
Waxyaabo badan ayaa ka hadhay sidii caddaalad looga gaadhi lahaa sinnaanta ragga iyo dumarka ee Iswidhan. Laakiin haddana muddo gaaban ayey waxyaabo badani isku baddaleen. Muddo siifog mey ahayn markii raggu ay xukumi jireen dumarka. Dumarku waxay ahaayeen dhaqaale ahaan kuwo ragga ku xidhan. Waxay noqonaysay naag ama xaas, hooyo iyo hooyadii guriga. Maanta dhammaan waa la isku waafaqsan yahay in la siman yahay. Dumarka iyo raggu waa in ay bulshada ku yeeshaan xuquuq iyo fursado isku mid ah. Dumarka iyo ragga labaduba waa in ay waalid noqon karaan isla maraakana helaan shaqo xirfadeed.

- Siday xaaladdan dumarka ee Iswidhan uga duwen tahay marka aad u eegto tii waddankaaga?
- Maxay ku wanaagsan tahay maxayse aanay ku wanaagsanayn?

Aragtida ninnimada
Waxa loo arko ”haweennimo” ama ”ninimo” way ku kala duwen yihiin wakhtiyada iyo mujtamacyada kala duwenba.

Maxaa ”ninimo ah” oo maax ”ninimo aan u ahayn” mujtamaca Iswidhan deggen maanta? dabcan way kala duwen yihiin.
Halkan waxa ah jawaabta su’aal ka timid dhowr gabdhood iyo dhowr nin:
”Ninimo la’aantu waa marka ninku uu xaaskiisa hanan keri waayo ama ka warhayn waayo.”
”Qof dumar ahi ma kari karto in ay muujiso dareennada qaarkood”.
”Dhibaatada oo xoog lagu xallillo waxaan u arkaa in ay tahay callaamadda ninimo la’aanta”.
”Waxay ila tahay in ay ninimo tahay in la qaato fasaxa aabbaha oo guriga ilmaha lala joogo.”

- Maxaad ”ninimo” u argtaa adigu (vad är manlighet för dig)?
- Ma kula tahay waxaad aaminsantahay in uu ka duwen yahay waxay waalidiinaadu aaminsan yihiin?
- Maxaad ugu malaynaysaa in nimanka iswidhishku mararka qaarkood aanay ninimo ugu arag qaar ka mid ah dadka ajnabiga ah?
- Maxaad ugu malaynaysaa in nimanka ajnabiga ahi ay mararka qaarkood ugu arkaan iswidhishka in ay ”dumarka quudhsadaan”?

Taariikhda qoyska iswidhishka
Waddanka Iswidhan *dumarka aan la qabin* waxa qaan gaadh loo arkayey ama in ay mas’uul noqoto ugu horrayn sannadkii 1858kii, waa haddii ay iyadu taas codsato.
Laga bilaabo sannadkii 1863kii dumarka aan la qabin waxay si toos ah qaan gaadh ama mas’uul u noqdeen marka ay da’doodu tahay 25sannadood.
Sannadkii 1884kii waxa xadka dad’da qaan gaadhka hoos loogu soo dhigay 21 sano.

Laga bilaabo sannadkii 1864kii ninku xaq umuu lahayn in uu dilo xaaskiisa ama naagtiisa.

1874kii naagta la qabaa waxay xaq u yeelatay in ay maamulato lacagta dakhliga ee soo gasha iyo hantideedaba.

1915kii waxa dumarka loo oggolaaday in ay wax furi karaan.

Dumarka la qabaa waxay qaan gaadh noqdeen marka ay yihiin da’da 21 jirka ugu horrayn sannadkii 1920kii. Markaas oo ay heleen xuquuq dhaqaale iyo sharci oo la mid ah ta ninku leeyahay.

1921kii waxay dumarku xaq u yeesheen Iswidhan in ay codeeyaan isla markaana siyaasadda ay ka qayb galaan oo la dooran karo.

Ugu horrayn sannadkii 1965kii haddii naagta guur lagu qasbbo ninka ciqaab ayaa lagu soo rogay.

- Wax faallo ah miyaad ka qabtaa sannaddadaas laga soo sheekeeyey?
- Goorma ayey naagtu xaq u yeelatay waddankaaga in ay codayso?
- Ma jiraan waxyaabo kale oo xiise leh oo barbardhig lagu smayn karo oo aad samayn karto?

Aragtida laga qabo jacaylka iyo guurka
Guurku ma waxa uu ku dhisnaanayaa jacayl mise jacaylku guurka dhexdiisa ayuu ku korayaa? ayaa go'aaminaya guurka? Da'dee ayuu qofku ku guursanayaa? Siday noqonaysaa? arrimahaasi way kukala duwenaayeen xilliyada iyo dhaqamada. Xitaa waddankan Iswidhan caadooyinku aad ayey iskugu baddaleen. Waayadan dambe waxa caadi noqotay in dhallinyaradu ay wada deggaan inta aanay isku guursan. Qaar badan ayaa wada nool iyaga oo aan is qabin.

- Haddaba waa kuwee isbaddelada ku dhacay aragtida laga qabo jacaylka iyo guurka ee waddankaaga hooyo?
- Ma jiraan farqiyo u dhaxeeya eheladaada oo ay arrintaas ku kala duwenyihiin?

Aragtida laga qabo isku galmoodka
Sida loo arko isku galmoodku wuu ku kala duwenaa xilliyada iyo dhaqmadaba. Mujtamaca intiisa badani wuxu isku dayey in uu kantaroolo galmoodka haweenka si loo ogaado qofka dhalay ee aabbaha u ah ilmaha. Waddankan Iswidhan ciqaab adag ayaa la marin jiray isku galmoodka bilaa guurka ku dhaca.

> "Dumarka waaweyn may haysan oo qudha aqoon yarida iyo haysasho la'aanta qalabka ka hortagga uuraysiga, ee waxa jirey oo kale fikradda ay ka qabaan galmoodkooga. Haddaba rabista dabiiciga ah ee dumarku rag u baahanyihiin oo dhan dumarku may muujin jirin, kolkaa qofku wuxu noqon jirey waxa loogu yeedho naag nin u waalan. Gabadhu iyadu may ahayn ta bilowda ee sheegata in ay doonayso in ninka ay jeceshay oo ay la noolaato, may sheegan karayn jacaylkeeda, dumarka kharriban oo qudhan ayuumbaa sheegan jirey "oo sidaas ahaa".
> *Kalkaaliso caafimaad oo nololeed oo ka tirsan bulshadii hore ee beeraleyda ee Gotland.*

Ma jirto aragti guud oo "iswidhish" oo ku saabsan isku galmoodka, laakiin maanta dadka intooda badani waxay oggolaadeen in ay wada noolaadaan xaaladda jacaylka ee guurka ka horraysa.

Bilowgii qarningii 20naad Iswidhan waxay ahayd waddan faqiir ah, oo xaasaskuna ay lahaayeen carruur badan. Tobankii ilmoodba hal ilmo ayaa wuxu dhiman jirey isaga oo aan sannad gaadhin. Haween badan ayaa waxay u dhinteen ilmo iska soo ridid sharci darro ah. Qalabka ka hortagga uuraysiga waa la oggolaaday. Carruurta la iska soo ridaa immika hoos ayey u dhacday dhimashada carruurta ee duniduna way hooseysaa.

Casharrada dugsiyada lagu dhigo ee isku galmoodka iyo wada noolaanshuhu wuxu xoogga saarayaa qadderinta, sinnaanta iyo in dadku isku qiimo yihiin. Dhallinyaradu waxay ogaanayaan sida jidhku u shaqeeyo, isku galmoodka uuraynta iyo uuraysiga, qalabka ka hortagga uuraysiga iyo cudurrada ku dhaca xubnaha jinsiga. Waxa kale oo weliba ay ka hadli karaan sida loo arko isku tagga iyo xidhiidhka, cilmiga akhlaaqda iyo mooraalka ama niyadda.

Meelaha dhllinyarada lagu qaabbilo ayaa dhallinyarada waxa lagu siiyaa talo ku saabsan fikradohooga ku saabsan sidii ay u noqolahaayeen dhallinyaro, waayeel una samaysan lahaayeen aqoosi qofnimo. Waxa kale oo weliba ay soo jeedin karaan su'aalo ku saabsan jidhka, isku galmoodka, waxaana talo laga siiyaa qalabka ka hortagga uuraysiga.

Wax dhigista ku saabsan wada noolaanshaha iyo meelaha lagu qaabbilo dhallinyarada laguma dhiirri geliyo dhallinyadu in ay yeeshaan xidhiidhho isku galmood ah. Waxay keenaan dheellitir muhiim ah oo ka soo horjeeda aragtita fudud ee laga qabo isku galmoodka iyo wada noolaashaha ee dhallinyaradu ay kala kulmaan warbaahinta ama saxaafadda.

- Maxaad ka ogtahay adigu waxa ay tahay in ilmahaagu uu ka barto dugsiga marka la dhigayo isku tagga iyo wada noolaanshaha?
- Adiga naf'ahaantaadu sideed ku heshay cilmiga ku saabsan jidhka, carruur dhalidda iyo waxyaabaha la midka ah?

Sharafta iyo cisiga
Marka dumarka laga hadlayo sharaftu Iswidhan waxa weeyi had iyo jeer isku galmoodka iyo xidhiidhka dumarku ay ragga la leeyihiin. Laakiin marka ragga laga hadlayo sharafta iyo cisigu wax xidhiidh ah lamay lahayn la galmoodka haweenka. Waxay aad ugu saabsantahay xuquuqda iyo is daafacidda.

Waalidiin badan oo ka yimidday waddamada kale ee adduunka ayaa ka werwersan haddii hablohoodu bilaabaan in ay la noolaadaan "iswidhish", iyaga oo doonaya in iskugalmoodka ay khibrad u helaan guurka ka hor sida ay iswidhishku qabaan. Badanaa waxa la aaminsan yahay in gabdhaha iswidhishku ay haystaan xorriyad dheeraad ah oo run ahaantii aanay haysan.

Haddii gabdhaha lagu dhaqo qawaaniin adadag si ay isku ilaaliyaan, taasi waxay ku keenaysaa in ay bilaabaan in ay ku noolaadaan laba "nololood" – Guriga si ayey ku joogayaan si ka duwenna saaxiibadooda ayey kula joogayaan.

Sharaftu waa mid muhiim ku ah qoyska marka ehelada laysku agnoolyahay. Kolkaas oo sumcaddu ay micno weyn leedahay. Awoodda sumcaddu weli waxay ka jirtaa oo ay ka nooshahay bulshooyinka yaryar ee iswidhishka, laakiin caadi kama ah magaalooyinka.

Marka ay ugu darantahay werwerka waalidiinta ay ka qabaan gabdhaha iyo sharafta qoysku waxay keenaysaa dibindaabyeyn, haddidaad iyo qasbid ama xoog ku muquunin. Dadka intiisa badani wuu ka soo horjeedaa hagardaamaynta iyo sharaf rididda kale. Laakiin haddana xoogista ragga ee dumarku way ka dhexdhacdaa bushada iswidhishka. Waa muhiin in lala dagaallamo haddidaadda iyo xoogista iyada oo laga wada hadlayo sobobta keeneysa iyo sidii looga hortegi lahaa.

- Adigu sharafta sideed u aragtaa (vad betyder heder för dig)?
- Maxaa u dhaxeeya haddii kantaroolka ay bulshadu samayso ama qoysku?
- Maxaad u malaynaysaa in ay joojin karto khilaafka u dhaxeeya xubnaha qoyska ee keena xoog ku muquunin?

Maaha hablaha oo qudha
Xaalladdu waxay xitaa ku adkaan kartaa innamada iyo ragga dhallinyarada ah. Mararka qaarkood waa in ay ilaaliyaan hablohooda yaryar ee ay walaalaha yihiin, in kasta oo aanay iyagu dooneyn. Waxa kale oo weliba ragga dhallinyarta ah laga sugayaa in ay ka guursadaan dhallinyarada ay ku dhex jiraan.

”Waalidka Cali waxay rajeynayaan in uu guursado gabadh kurdiyad ah, laakiin dhowr sannadood ka hor wuxu saaxiib la ahaa gabadh iswidhish ah. Immika wuxu joogaa laba waddo oo nolosha ah in uu kala doorto: In uu raaco dhaqanka qoyskiisa iyo in uu ku noolaado ka iswidhishka. Fikraddu waxay ku milmaysaa madaxa isago sariirta dherer u jiifa maalin dhan. Maalmaha kalase wuxuu ku faraxsan yahay in uu wax barto oo uu faafiyo fikradaha oo dhan.
In qofku ku noolaado laba dhaqan waxay dhibaato ku tahay labadaba wiilasha iyo gabdhahaba, sidaas ayey Cali la tahay. Qiimo adag ayey ku kacaysaa in aan la raacin dhaqanka qoyskaaga, xitaa haddii uu qiima aad u sarreya gabdhaha ku kacayo.

- Cadaadiskee bay dareemi karaan ayey kula tahay gabdhuhu marka ay ku koraan dhaqammo badan?
- Cadaadiskee bay dareemi karaan ayey kula tahay ragga dhallin yarada ahi marka ay ku koraan dhaqammo badan?

In la qaado waddo cusub
Sidee buu xaalku noqonayaa marka dhaqamada, caadooyinka, qaanuunada iyo qiimayntuba ay is baddelaan? Ayaa xuduud u yeelaya oo yaa ansaxinaya in la hagaajiyo oo hab cusub loogu sameeyo qolooyinka kooxaha ama qoysaska?

- Sidee bay suurtagal u ahayd in wax laga baddelo qoyskaaga markii aad koreysay?
- Ayaa maanta bixinaya ”fasaxa ama oggolaanshaha” sida cusub ee loo turjumayo waxa lagu oggolaanayo dhaqan ahaan kooxdiinna?